

## Ereyada naafanimada korriinka ee aad u baahan tahay in aad ogaato

- **K Plan/Community First Choice:** Waxay gobolka siisaa xuquuqda uu ku isticmaalo lacagaha federaalka si loo kordhiyo adeegyada bulshada.
- **Iska dhaafida Medicaid:** Waxay dadka caawisaa in ay helaan adeegyada daryeelka muddada fog halkii ay ka heli lahaayeen xarun daryeel oo degdeg ah oo loogu talagalay dadka qaba I/DD, guryaha la isku daryeelo ama isbitaal.
- **Hawlaha nolol maalmeedka (ADL-yada):** Waxyaabaha aan caadi ahaan u sameyno nafteena sida qubeyska, lebisashada, wax cunista iyo cabida.
- **Hawlaha nolol maalmeedka muhiimka (IADL-yada):** Hawlaha dadka u oggolaada in ay si madax banaan ugu dhex noolaadaan bulshada; waxyaabaha dadka waaweyn sida caadiga ah sameeyaan sida shaqada guriga, maamulida lacagta, diyaarinta cuntada iyo soo adeegashada.
- **Isku duwaha adeegyada:** Oo sidoo kale loo yaqaano maamulaha kiiska, qofkani wuxuu dadka ka caawiyaa in ay helaan adeegyada si ay u daboolaan baahiyahooda, oo ay ka mid yihiin in ay ka caawiyaan qoritaanka qorshe taageero sanad kasta.
- **Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS):** Hay'ada gobolka ee qorta xeerarka adeega lana socota CDDP-yada iyo hay'adaha kale si loo xaqiijiyo in ay raacayaan xeerarka.

- **Barnaamijka naafanimada korriinka ee bulshada (CDDP):** Hay'ad ku taala degaanka oo bixisa adeegyada maamulka kiiska si dadka looga caawiyo in ay helaan adeegyada ay u baahan yihiin.
- **Qiimeynta baahiyaha carruurta:** Qiimeyn uu sameeyo isku duwaha adeegyada ama wakiilka gobolka si loo aqoonsado baahiyaha taageero ee ilmahaaga.

## Adeegyada kale ee la bixiyo iyada oo la adeegsanayo ODDS

Waxaa dhici karta in aad rabto inaad isku duwahaaga adeegyada weydiiso barnaamijyada kale ee ODDS oo ay ku jiraan:

- **Adeegyada Carruurta ee Guriga Dhexdiisa ee Ballaaran** — barnamijyo loogu talagalay carruurta leh baahiyo taageero oo caafimaad ama dabeecadeed oo aad u adag;
- **Adeegyada ka baxsan guriga** — kuwani waxaa ka mid ah daryeelka taageerada oo 24-saacadood ah sida, ilmo korsiga, guryaha wax marti geliya iyo guryaha koox ahaanta loo degan yahay;
- **Adeegyada taageerada qoyska** — Taageero aan degdeg ahayn, sida daryeelka gargaarka ama qalab gaar ah;
- **Nidaamyada Isku xirka Qoys ilaa Qoys kale** — Mid ayay dhici kartaa in laga helo degaankaaga. Waxaad la kulmi kartaa qoysaska kale oo waxka ogaan kartaa ilaha degaanka.

Si aad u hesho xafiiska naafanimada korriinka ee degaankaaga, booqo <https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/cddp.aspx> ama wac 503-945-5811.



## Office of Developmental Disabilities Services (ODDS)

500 Summer Street NE E02  
Salem Oregon 97301

Telefoonka: 503-945-5811  
TTY: 1-800-282-8096



Naga raadi Facebook:

<https://www.facebook.com/oregonDHS.IDD/>

La xiriir CDDP degaankaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka kala xiriir [DD.DirectorsOffice@odhsoha.oregon.gov](mailto:DD.DirectorsOffice@odhsoha.oregon.gov) ama 503-945-5811 (cod/qoraal). Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.

# Adeegyada loogu talagalay Carruurta qabta Naafanimada Maskaxda ama Korriinka



**Carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka waxay si dabiici ah taageero uga helaan, qoyska, asxaabta, bulshooyinka iimaanka/ diinta leh iyo ururada kale oo bulshada. Waaxda Adeegyada Dadweynaha iyo Medicaid ayaa bixisa taageero dheeraad ah. Fiiri barnaamijyada la heli karo.**

### Taageerada Medicaid

Medicaid waa barnaamij gargaar oo federaalka iyo gobolku dhaqaalihiisa bixiyo oo loogu talagalay dadka da'kasta leh ee aan iska bixin karin lacagta adeegyada caafimaadka iyo taageerada. Carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) ayay dhici kartaa in ay helaan taageero dheeraad ah.

- Iyada oo aan la eegayn tirada lacagta ee aad sameyso, waxaa dhici karta in ilmahaagu hadda heli karo Medicaid.
- Haddii ilmahaagu u qalmo Medicaid, isaga ama iyadu waxay heli karaan adeegyada caafimaad oo la adeegsanayo Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo <https://www.oregon.gov/oha/hsd/ohp/pages/index.aspx>.

### Taageerada ODHS

Iyada oo ku xiran qiimeynta, waxaa sidoo kale dhici karta in ilmahaagu heli karo:

- Isku duwida adeega si looga caawiyo fahamka adeegyada I/DD;
- Fursado dheeraad ah oo loogu talagalay ilmahaaga si uu noqdo xubin firfircoon oo ka tirsan bulshada;
- Bixiyayaasha daryeelka nasashada;
- Daryeel bixiyayaal dheeraad ah si ay gacan uga geystaan baahiyaha dhanka daryeelka ee maalintii;
- Tababar loogu talagalay qoyska si uu u fahmo sida ugu wanaagsan ee loo taageero ilmahaaga;
- Ka caawinta sidii guriga loo beddeli lahaa oo looga dhigi lahaa daryeel sahlan oo loogu galay ilmahaaga ee halkaasi.

### Sidee baan u bilaabaa?

- Faddlan booqo meeshan la sii gelayo 'link 'si aad u hesho codsiga loogu talagalay adeegyada: <https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/eligibility.aspx>; or
- La xiriir barnaamijka naafanimada korriinka bulshada (CDDP) ee degaankaaga wixii la xiriira codsiga. Booqo <https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/cddp.aspx> wixii la xiriira liiska.
- Buuxi codsiga oo ku dir email, boosto, ama ku dhaaf CDDP degaankaaga.

Nidaamkani wuxuu qaadan karaa waqti. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa in aad sida ugu dhakhsaha badan u bilawdo.

### Maxaan filan karaa haddii ilmahaagu u qalmo adeegyada I/DD?

Ka dib marka ilmahaagu u qalmo adeegyada I/DD, isku duwaha adeegyada ayaa kula soo xiriiri doona si loo qabto ballanta qiimeynta baahiyaha ilmahaaga. Qiimeyntu waxay ODDS ka caawin doontaa in ay fahamto waxa ilmahaagu sameyn karo iyo waxa uu caawimaad uga baahan yahay in uu sameeyo.

### Iskala talinta kala doorashada

Wax yar ka dib qiimeynta, waxaad la kulmi doontaa isku duwaha adeegyada si aad wax uga ogaato adeegyada uu heli karo ilmahaagu. Waxaad awoodi doontaa in aad doorato adeegyada sida fiican u daboolaya baahiyaha ilmahaaga.

### Qorshaha Taageerada Shaksi (ISP)

Isku duwaha adeegyada ayaa kula kulmi doona ugu yaraan hal mar sanadkii si loo qoro qorshe daboolaya baahiyaha la qiimeeyay ee ilmahaaga, waxyaabaha uu doorbidayo iyo hadafyada.

Xusuusnow — adiga ayaa maamula qorsheynta taageerada ilmahaaga. Adiga ayaa go'aan ka gaari doona kuwa ay yihiin adeegyada ilmahaaga ka caawin doona in uu ku nolaado nolol wanaagsan.

**Dhammaan carruurta waxay u baaan tahay kal gacal, amni iyo taageero.**

Carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) waxaa dhici karta in ay helaan taageero iyo adeegyo dheeraad ah iyada oo ku saleysan qiimeynta baahiyahooda.